

# Waxa Aad Filanayso: Qoraalka Booqashada Xarunta Talaalka COVID-19 ee Gobalka

*[muusig macaan]*

[Hagaha aaga Baakinka] Subax Wanaagsan! Maanta ma leedahay balan?

[Qoraalka Shaashada] Haa, balamo ayaan leenahay.

[Hagaha aaga Baakinka] Haa, waxaad leedihiin balamo, waa hagaag. Labadiinuba ma waxaad ka wayn tihiin da'da 18 jir.

[Qoraalka shaashada] Haa, waanu ka waynahay 18 jir.

[Hagaha aaga Baakinka] Hagaag. Ma jiraa midkiin oo cilado naafo qaba, cilado dhanka dhaqdhaqaaqa ama dhanka socodka ah?

[Qoraalka Shaashada] Maya

[Hagaha aaga Baakinka] Hagaag. Waxay noqon inaad toos horay ugu socota. Dadka qaba midabka oranjiga ayaa ku tusiya meesha aad baakinka ku galayso. Markaad baakinka gasho, waxaad geli doontaa teendhada wayn. Maalintu hakuu wacnaato.

*[muusig macaan]*

[Hagaha Banaanka] kan ka dulgasho maaskarada aad hadda qabto. Diyaarso baarkoodhkaaga. Teendhada dhanka midig.

*[muusig macaan]*

[Qoraalka Shaashada] Dhammaan xarumaha talaalka ayaa leh caawimaada luuqada ee la heli karo.

[Shaqaalaha Gudaha] Sidee tahay marwo? Ma arki karaa baarkoodhka balantaada? Hagaag fadlan dhankaan soo aad. Halkaas ayay kugu daryeeli doonaan waxayna kuu qabanayaan miis.

*[muusig macaan]*

[Shaqaalaha Leenka] Sidee tihiin saaxiibayaal, diyaar ma tihiin, ma faraxsan tihiin? Waa hagaag, marka waxay noqonaysaa wax aad u fudud. Ma jiro meel aad ugu baahan tahay baarkoodhkaaga, waxaan keliya doonaynaa inaan hawsha fulino waxaana doonaynaa inaan ku xirno lambarka taleefankaaga. Marka markaad diyaar tahay waxaan kuu diraynaa hoos iyo leenka koowaad.

*[muusig macaan]*

[Shaqaalaha Albaabka gelitaanka] Salaan, subax wanaagsan. Ma heli karaa lambarka Taleefanka aad isku diiwaan gelisay? Ma ii xaqiijin kartaa magacaaga iyo taariikhda dhalashada? Tani ma kuuradaadii koobaad baa?

[Qoraalka Shaashada] Haa

[Shaqaalaha Gelitaanka] Ma dareemaysaa astaamaha COVID maanta?

[Qoraalka Shaashada] Maya

[Shaqaalaha Gelitaanka] Ma la joohtay qof qaba COVID intii lagu jiray 14 maalmood ee lasoo dhaafay?

[Qoraalka Shaashada] Maya

[Shaqaalaha Gelitaanka] Halkaan waxaad ka helaysaa xog ku saabsan talaalka haddii aad doonayso talaal wayna kuu sheegi doontaa meesha aad tagayso.

[Shaqaalaha gudaha] Heloow marwo subax wanaagsan. Fadlan isoo raac.

*[muusig macaan]*

[Shaqaalaha talaalka] Ma ii xaqiijin kartaa magacaaga buuxa iyo taariikhda dhalashada fadlan? Waxaan ku waydiinayaa dhawr su'aalood oo boobsiis ah. Magacaygu waa Sean Skinner, waxaana doonayaa inaan ku siiyo talaalkaaga maanta. Miyaad heshay wax talaal ah 14-kii maalmood ee lasoo dhaafay?

[Qoraalka Shaashada] Maya

[Shaqaalaha Talaalka] Ma qabtaa wax astaamaha qaboowga ama hargabka oo kale ah?

[Qoraalka Shaashada] Maya

[Qoraalka Shaashada] Waxaa sidoo kale lagu waydiin doonaa inaad qabto wax xasaasiyaad ah ama aad horay xasaasiyaad uga qaaday talaallada.

[Shaqaalaha Talaalka] Kadib ma qabtaa wax su'aalo ah gabi ahaanba?

[Qoraalka Shaashada] Dhib miyay gaysanaysaa?

[Shaqaalaha Talaalka] Waxay u badan tahay inaad dareemi doonin wax dhib ah, haddii aad dareento waa wax aad uga yar qandhuufo. Waad kusocon kartaa waxaadna soo bixin kartaa gacantaada bidix.

[Qoraalka Shaashada] Adoon ogaan ayaaba la dhamaynayaa!

[Shaqaalaha Talaalka] Marka kani waa kaarkaaga talaalka. Waxa aad samaynayso waa inaad wali buuxinayso xogtaada halkaan waana inaad xaqiijiso inaad keenayso xogtaan markaad u timaado kuuradaada labaad. Halkaan ayay ku qori doonaan xogta kuuradaada labaad. Hadda waxaad aadaysaa -- halkaas ayaad tagaysaa oo ah aaga lagugu kormeeraayo ee gadaasha daaha madoowa. Marka waxaad joogaysaa halkaas 15 daqiiqo kadibna waad bixi kartaa intaas kadib!

*[muusig macaan]*

[Shaqaalaha Kormeerka] Salaan, subax wanaagsan! Fadlan kursi ka qaado geeskaan. Waxaad xisaabsanaysaa 15 daqiiqo. Gacanta taag haddii aad qabto wax su'aalo ah, walaacyo ah. Marka ay 15 daqiiqo kuu dhamaatana, waxaad ka baxaysaa albaabka bidix.

*[muusig macaan]*

[Qoraalka shaashada] 15 daqiiqo kadib.

*[muusig macaan]*

[Qoraalka shaashada] Sawir ku gal Goobta Sawirka! Soo geli baraha bulshada adoo raacinaaya sumada #RollUpYourSleevesMN.

*[muusig macaan]*

[Qoraalka Shaashada] Mudayso balanta talaalka COVID-19 maanta! Vaccineconnector.mn.gov ama wac 833-431-2053 (Isniin-Jimce 9 a.m. – 7 p.m., Sabti 10 a.m. – 6 p.m.)

*[muusig macaan]*

Minnesota Department of Health  
Communications Office  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-4989  
[health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

5/12/21 (Somali)

*Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab ka duwan ah, wac: 651-201-4989*